

Dib-u-heshiisiinta Galmudug: Geeddi-socodka, Caqabadaha iyo
Fursadaha (SPA Governance Podcast)



Dib-u-heshiisiinta Galmudug: Geeddi-socodka, Caqabadaha iyo Fursadaha (SPA Governance Podcast)



Somali Public Agenda

April 8, 2021

Dib-u-heshiisiinta Galmudug: Geeddi-socodka, Caqabadaha iyo Fursadaha (SPA Governance Podcast)

Soomaaliya waxay soo martay xasillooni darro weyn tan iyo markii la riday dowladdii milateriga ahayd 1991. Isku dhacyada rabshadaha wata ee u dhexeeya qabaa'illada iska soo horjeeda ayaa caadi ka ahaa dalka oo dhan, kuwaasoo ka dhashay inta badan biyo yari iyo kheyraadka daaqa. Colaadaha noocan oo kale ah waxay keeneen isku dhacyo muddo dheer socdey oo ay adkaatay in la xalliyo. Mid kamid ah tusaalaha ugu muhiimsan waa maamulka Galmudug, oo ay sameysteen gobollada Galgaduud iyo Mudug, iyadoo taariikh ahaan

Dib-u-heshiisiinta Galmudug: Geeddi-socodka, Caqabadaha iyo
Fursadaha (SPA Governance Podcast)


ahaayeen labadan gobol goobo ay ka jiraan loollan siyaasadeed oo qaraar iyo dagaallo isdaba joog ah, iyadoo kooxo badan ay sheeganayeen inay ka taliyaan qeybo kala duwan oo labadan gobol katirsan. Muddadii 2015 ilaa 2019 Galmudug labo ayay u kala jabtay, maamullo kala gaar ahna waxaa laga kala dhisay dhumasareb iyo Cadaado. Sikastaba ha noqotee, kadib isku dayo badan oo dib-u-heshiisiin oo ay ku guuldareysteen dhinacyo kala duwan, geeddi-socodkii ugu dambeeyay ee la doonayay in lagusoo dabaalo nabad iyo in la dhiso dowlad xasilan ayaa waxaa laga gaaray guul.

Podcast-gan waxa ay Maxamed Shariif, Mahad Waasuge, Farxaan Isaaq Yuusuf ku falanqeynayaan natijoooyinka kasoo baxay daraasad cilmiyaysan oo falanqeyneysa geeddi-socodka dib-u-heshiisiinta siyaasadeed iyo bulsho ee degaannada Galmudug.


Daraasadan waxaa sameeyay Somali Public Agenda intii u dhaxeysay bilihii Luulyo iyo Sebteember 2020, iyadoo taageero laga helayo hay'adda Interpeace.

Click here to listen the podcast on [Apple Podcasts](#).

Share This :



.



.



.

Leave a Reply

Your email address will not be published. Required fields are marked *

Comment *

Name *

Email *

Website

Dib-u-heshiisiinta Galmudug: Geeddi-socodka, Caqabadaha iyo
Fursadaha (SPA Governance Podcast)

Post Comment

Δ

Recent Post



08 Sep 2025

E.37 Adeegyada Xalka Waara iyo Horumarinta Reer Miyiga



05 Sep 2025

E.57 Heshiiska Dowladda Federaalka iyo Qeyb Kamid ah Madasha Samatabixinta


Dib-u-heshiisiinta Galmudug: Geeddi-socodka, Caqabadaha iyo
Fursadaha (SPA Governance Podcast)



31 Aug 2025


Daahfurka SPA Polls ee Somali Public Agenda

Categories




•

[SPA Videos](#)




•

[SPA Forums Vidoes](#)



•


[TV Highlights](#)




•

[Radio Highlights](#)

Follow Us



[Icon-facebook Instagram](#)



[Twitter](#)

[Linkedin](#)

Dib-u-heshiisiinta Galmudug: Geeddi-socodka, Caqabadaha iyo
Fursadaha (SPA Governance Podcast)



[Youtube](#)

Dib-u-heshiisiinta Galmudug: Geeddi-socodka, Caqabadaha iyo
Fursadaha (SPA Governance Podcast)

